

Sida loo codsado warqada doorashada ee maqanaanshaha – Agoosto 2-deeda

Waad ka codeyn kartaa gurigaaga Agoosto 2-deeda ee doorashada kowaad adigoo adeegsnayo codaynta maqanaanshaha.

Si aad u codsato, si sahlan halkan uga tag **Michigan.gov/Vote** oona xaqiiji aqoonsigaaga oo la socda xog shakhsiyeedka qaar oo uu kujiro shatida daraawalnimada ama nambarka Aqoonsiga ee gobolka.

Riix badhanka si aad u gudbiso codsigaaga oona sug warqadaada doorashada si ay ugu soo dhacdo boostada.

Sidoo kale waxa jira wadooyin kale aad ku codsan karto.

Waxaad ka daabici kartaa codsiga halkan **Michigan.gov/Vote**, buuxi oona saxiix, kadib ka qaad sawir oona iimeyl ahaan uga dir karraanigaaga ama boosto ahaan uga dir ama xafiiskooda uga keen. Haddii aad aado xafiiska karraanigaaga **inta u dhaxeysa Juun 23-deeda iyo 4 galabnimo (10 saac) oo ah 1-da Agoosto**, waad codsan kartaa sidoo kale waad codeyn kartaa labadaba inta halkaas aad joogto adigoo ku dhamaysanayo hal safar.

Waxaad ka heli kartaa cinwaanka karraanigaaga iyo telefoon nambarkiisa halkan **Michigan.gov/Vote**.

Haddii aad codsato in lagu soo diro warqadaada doorashada, waxaad kadabagali kartaa warqadaada doorashada halkan **Michigan.gov/Vote** oona arag goortii karraaniga ay gaartey codsigaaga oona uu bixiyey warqadaada doorashada.

Ikhtiyaar walbo oo aad doorataba si aad u gudbiso codsigaaga, fadlan samee sidaas waqtigaaga ugu dhow ee aad fursad u leedahay. Hadba sida ugu dhakhsaha badan ee codbixiyayaashu u ogeysiiyaan karraaniyadoodu inay rabaan inay ku codeeyaan maqnaanshaha, ayaa hadba sii fududaysa habsami u socodka doorashada ee qof walba.